

Xeer-Sharci 26 Maarso 1957, lamba. 4 rep

Wax ka baddalka qod. 64 Xeerka Nidaamka Garsoora Soomaaliya

MAAMULAHA

Marka uu arkay xeerka Jamhuuriyadda Talyaniga ee 4 Nofember 1951, ee lagu ansixiyay laguna fuliyay Heshiiska Ilalinta Dhulka Soomaaliya;

Marka uu arkay qod. 8 Xeerka Nidaamka Garsoorka ee 5 Jannaayo 1956, lamba. 2 ee ku saabsan awoodda Golaha Xeer-Dejinta iyo habraca samaynta xeerarka Dalka;

Marka uu arkay Amarka 2 Febbraayo 1956 lamba. 5, e Xeerka Nidaamka Garsoorka Soomaalia;

Marka uu garowsaday baahida iyo deg-degga loo qabo – si loo gaaro caddaalad- lagu tallaabsado wax ka baddalka qod. 64 Xeerka Nidaamka Garsoorka Soomaalia, ee la xariira xadka ugu hooseeya ee racfaan qadashada xukunada madaniga, iyado khalad xagga qalabka awgeed lagu sheegay So. 250 halkii ay ka ahayd So.25;

Marka uu dhagaystay Golaha Wasiirada; soo jeedinta Wasiirka Koobaad.

WUXUU XEER KU SOO SAARAYAA

Qod. 1

Qod. 64 ee Amarka 2 Febbraayo 1956, lamba. 5, ee ku saabsan Xeerka Nidaamka Garsoorka Soomaaliya, waxaa loo baddalay sidaan:

“Lagama qaadan karo racfaan xukunada uu ku dhawaaqo Garsooraha Gobolka iyo kan Qaalliga marka qiimaha dacwadda aanu ka badnayn 25, marka lag reebo mararka ay jirto cillad xagga garsoorka ama iqtisaaska”

Qod. 2

Xeerkaanu waxaa la horgeynayaa Goolaha Xeer-dejinta, sida uu qabo qod. 8 Amarka 5 Jannaayo 1956, lamba. 2 si Xeer loogu baddalo.

Maamulaha

P. Franca

CABDULLAAHI CIISE MAXAMUUD

La sugay lana diiwaangeliyay – Diw. lamba. 2, bogga lamba. 99

Muqdisho, 26 Maarso 1956.